

**SHARCI Lamb. 1 ee 21 Oktober 1969**

**Micnaha sharci ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Kadib markii la arkay Baaqa Kaacanka.

Kadib markii la garoowsaday baahidda deg degta ah loo qabo kadib markii Kacaanka 21 Oktoober 1969 u dhashay in la soo saro qoraalkii sharci ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya si loo abuuro bilow xeer nidaamiye ee dalka gudahiisa.

**WUXUU AMRAY SHARCIGAAN**

**Qod. 1**

Howlaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Barlaamanka Qaranka, Golaha Wasiiradaha, Wasiiradaha gooni gooni ah iyo Golaha Sare ee Garsoorka, xilka Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare waxaa la wareegay Golaha Sare ee Kacaanka, habka iyo qaabka lagu qoray xeeraarka khuseeyo ama sida uu Golaha laftiigiisa uu caddeyo.

**Qod. 2**

Xeerarka sharciga ah ee ka jira dalka Somaliya ilaa 20 Oktoobar weli waa lagu dabaqi doono dalka Jamhuuriyadda Dimuqratiga Somali, ilaa iyo intii si toos ah Golaha Sare ee Kacaanka uu buriyo ama lalo ama beddelo.

**Qod. 3**

Xilaalka iyo qaabka xafiisyada iyo adeegyada ka shaqeeya Dowladda Jamhuuriyadda Somaliya ilaa 20 Oktoober 1969, weli way ka socon doonaan Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya ilaa iyo intii Golaha Sare ee Kacaanka dad cusub la magacaabo ama la dhiso hey'ada kale.

**Qod. 4**

Waxaa reebban xeer kasta uu ka horimaanayo sharcigan iyo jiritaanka kacaanka.

**Qod. 5**

Wuxuu sharcigan hirgeli doona laga bilaabo 21 Oktoober 1969 waxaa lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya.

Waxaa la faraya in cid kasto ay u hoggansanato sharcigan uuna u hoggamisiyo cid kasta ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya.

Muqdisho, 21 Oktoober 1969.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

**SG Mohamed Siyaad Barre**